# Ka shaqeynta Finland

## – Warbixinta ajnabiga



European Union
European Social Fund

Leverage from the EU 2007–2013

Elinkeino-, liikenne- ja ympäristökeskus

Finnish Institute of Occupational Health

Finnish Institute of Occupational Health 2014
Working in Finland – Information for Immigrants/ Somali

## Ka kooban


Hordhac ........ 04

**1. Shakho raadinta** ........ **07**

Laxiriirista shaqo bixiyayaasha 07

Codsiga shaqada iyo wareysiga shaqada 11

**2. Shaqo bilaabista** ........ **15**

Noocyo kaladuwan oo shaqo 15

Heshiiska shaqada 18

Tababarka laqabsiga 21

Hayadaha shaqaalaha 23

**3. Xirfadaha iyo barashada shaqada** ........ **27**

Xirfadaha luuqada iyo Nolosha shaqada Finnish 27

Hormarinta xirfadaha shaqada 29

**4. Caafimaad iyo amni** ........ **33**

Amniga shaqada 33

Adeegyada caafimaadka shaqada 36

Jirro iyo awooda shaqo 39

**5. Kheyb ka mid ah bulshada shaqada** ........ **43**

Dhaqanka shaqada Finnish 43

Xiriirada bulshada shaqada iyo waajibaadka kormeeraha 45

Xadgudubka shaqada 47

Sinnaanta shaqada 50

**6. Shaqada oo kheyb ka ah nolasha** ........ **55**

Saacadaha shaqada 55

Shaqada iyo qoyska 58

**7. Joojinta shaqada** ........ **63**

Cazilaada 63

Ceyrinta 64

Ka noqoshada heshiiska shaqada 65

Shaqada dhamaadkeeda 66

**8. Ka ganacsiga finland** ........ **69**

## Hordhac

Shaqo ka bilaawida wadan cusub waxay noqon kartaa caqabad iyo inay su'aalo badan keento: sidee ayaan filanayaa inaan ugu dhaqmo goobta shaqada, waa maxay xaquuqdeyda iyo waajibaadkeyga iyo sideen ola qabsadaa bulshada shaqada?

Tilmaantaan waxay ku siineysaa warbixin ku saabsan nolosha shaqada Finnish. Waxyaabaha kale, waxay bixisaa talo ah sida shaqo loo helo, nidaamka laqabsashada, waajibaadka kormeeraha, dhaqanka shaqada Finnish, iyo caafimaadka iyo ladnaanta shaqada. Sidoo kale waxay soo jeedisaa ilo kale oo warbixin waxtar ah leh.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**Infopankki – Suomi sinun kielelläsi**
www.infopankki.fi

**Suomeen työhön: Tietoa Suomeen muuttajalle**
www.te-palvelut.fi › Esitteet

**Julkiset palvelut kootusti**
www.suomi.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhishka ah

**Infopankki – Finland på ditt språk**
www.infopankki.fi

**Jobba i Finland – Att leva och jobba i Finland**
www.te-tjanster.fi › Material

**Medborgartjänster**
www.suomi.fi

## Warbixin dheeraad oo afka Ingiriiska ah

**Infopankki – Finland in your language**
www.infopankki.fi

**Working in Finland**
**– Information about living and working in Finland**
www.te-services.fi › Materials

**Public services in Finland**
www.suomi.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Soomaaliga ah

**Infopankki – Luuqadaada oo Finland ah**
www.infopankki.fi



# 1. Shakho raadinta

Warbixinta ku saabsan fursadaha shaqo waxaa laga heli karaa dhinaca shaqo raadinta bogga intarneetka, hay'adaha' boggooda gaarka ah, iyo wargeysyada. Shaqooyinka qaar laguma xayeeysiiyo fagaare Waxaad ka heli kartaa warbixin ku saabsan shaqooyinka aan la shaacin dhinaca xiriirkaaga ama adigoo si toos ah ola xiriiro shaqo bixiyayaasha. Waa muhiim inaad firfircoonaatiid, si toos ah ola xiriir shaqo bixiyayaasha iyo si aad u weydiiso fursado shaqo.

Marka hore ka fikir shaqo noocee ayaad rabtaa iyo ogow sharuudaha shaqada noocaas ah ay leedahay. Shaqo helista sida caadiga ah waxay u baahantahay waxbarasho ku haboon, xirfadaha luuqad kufilan iyo waayo aragnimo shaqo hore.  Sikastaba, waxaa jira shaqooyin oo laga yaabo inay dalbanin waxbarasho gaar ah iyo xirfado luuqad. Dhiira galinta iyo daneynta shaqada aad codsaneysid aad ayay muhiim utahay.

- Adeega TE, xiriiriyaha isdhaxgalkaaga iyo maamulka socdaalka degmadaada ayaa kaa caawin karo xaaladaha laxiriirto shaqo raadinta iyo la talinta shaqada.
- Adeegyada TE waxay bixiyaan warbixin ku saabsan shaqo raadinta' xaquuqda iyo waajibaadyada.  Xeerka aan midibtakoorka-aheyn iyo xeerka Sinnaanta u dhaxeeyo Raga iyo Dumarka waxay difaacdaa midibtakoorka shaqaaleynta, tusaale.
- Ka laxiriir Adeega Socdaalka Finnish warbixin ku saabsan sharciyada deegaanshaha iyo magangalyo-doonka' xaquuqda shaqo.

Warbixin ku saabsan **fursadaha shaqo** waxaa laga heli karaa bogga shaqo raadinta intarneetka, shaqo bixiyayaasha' boggooda gaarka ah, iyo wargeysyada. Waxaa laga yaabaa inaad leedahay dad xiriirkaada gaarka ah oo garanaayo fursado shaqo; firfircoonow iyo weydii agagaarka.

Hab wanaagsan oo shaqo lagu raadiyo waa inaad si toos ah ula xiriirtaa shaqo bixiyayaasha ku daneynayo. Hadii aad daneyneysiid hay'ado ama shirkado gaar ah, fiiri hadii ay suuro gal tahay inaad gudbiso **codsi furanoo** boggooda ah xitaa hadii aysan xayeeysiineynin jagooyin furan. Sidoo kale waxaad udiri kartaa imeel ama wac shaqo bixiyayaasha ku daneynayo iyo weydii fursado shaqo.

Waxaad kula xiriir kartaa shaqo bixiyayaasha

- adigoo buuxinayo foomka codsiga shaqada boggooda
- Imeel
- dirista warqada jaldiga iyo CV
- wacista

Xasuuso inaad la heshiisiid shaqo bixiyaha shaqada kahor hadii aad qorsheyso inaad booqatiid goobta shaqada. Raac tilmaamaha shaqo bixiyaha oo ah sida loo codsado shaqada.

**Shirkadaha shaqaaleysiinta** faahfaahinta shaqo raadiyayaasha dukaamada. Sidoo kale waxaad ogeysiin ku reebi kartaa **Adeeyada TE Adeega CV-Net** adigoo ku sheegayo inaad shaqo raadineysid oo ay lajiraan faahfaahinta waayo aragnimaada iyo nooca shaqada aad raadineysid. Fursadahaaga shaqo raadin waxay hagaagtaa hadii aad isticmaasho wadooyin kala duwan oo shaqo raadintaada ah.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**Julkiset työ- ja elinkeinopalvelut**
www.te-palvelut.fi

**Avoimia työpaikkoja**
www.te-palvelut.fi › Työpaikat

**CV-netti työnhakijalle**
www.te-palvelut.fi › Työnhakijalle › Löydä töitä › Vinkkejä työnhakuun › Cv-netti

**Työhön Suomeen**
www.te-palvelut.fi › Työnhakijalle › Löydä töitä › Työhön Suomeen

**Maahanmuuttovirasto**
www.migri.fi

**Vuokratyö**
www.tyosuojelu.fi › Työsuhdeasiat › Vuokratyö

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**Offentliga arbets- och näringstjänster**
www.te-tjanster.fi

**Lediga jobb**
www.te-tjanster.fi › Lediga jobb

**CV-netti för arbetssökande**
www.te-tjanster.fi › För arbetssökande › Hitta jobb › Tips för jobbsökning › CV-netti

**Hitta jobb i Finland**
www.te-tjanster.fi › För arbetssökande › Hitta jobb › Hitta jobb i Finland

**Migrationsverket**
www.migri.fi

**Hyrd arbetskraft**
www.tyosuojelu.fi › Anställningsfrågor / Hyrd arbetskraft

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**Public employment and business services**
www.te-services.fi

**CV-Net service for jobseekers**
www.te-services.fi › For jobseekers › Finding a job › The CV-netti

**Work in Finland**
www.workinfinland.fi

**The Finnish Immigration Service**
www.migri.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Soomaaliga ah

**Adeega Socdaalka Finnish**
www.migri.fi

## Codsiga shaqada iyo wareysiga shaqada

Codsashada shaqo sida caadiga ah waa qoraal codsi iyo CV. Sida codsigaaga ku salesanyahay laga yaabo in wareysi shaqo laguugu casuumo iyo mararka qaar sidoo kale tijaabo kugu haboon. Kuwaan waxay shaqo bixiyaha ku caawinayaan inuu helo musharaxa ku haboon shaqada.

**Codsi shaqo oo wanaagsan** waa qaab fiican iyo waxay cadeysaa inaad heysatiid wax walboo shaqada ay u baahantahay, tusaale, aqoon, waayo arag shaqo ama xirfado luuqad. Codisga waa inuu ku qornaadaa gaar ahaan shaqada niyada aad ku heysiid iyo ku tus xirfadahaaga iyo dhiiro gelintaada, iyo si cad u sheeg sababta shaqadaan laguugu dooranaayo. Mararka qaar waxaa lagu weydiinayaa inaad ku dartid sharuudaha mushaarka codsigaada. Ku qor codsiga luugada xayeysiinta shaqada haday suuro gal tahay.

**CV wanaagsan** waa mawduuca oo habeysan iyo muhiimada. Waxaa kujira warbixin ku saabsan aqoontaada, waaya arag shaqo, xirfadaha luuqad iyo waxyaabaha kale oo soo kooba kartidaada sida shaqa doon. Waxaa kale oo aad ku qori kartaa magacyada iyo qoraalada ciwaanada marqaatiyada CV gaada, laakin mar walbo weydii ogolaanshadooda marka hore.

Waa inaad dhaqso timaadaa **wareysiga shaqada,**saacada lagu heshiiyay. Horay u qaado shahaadooyinkaaga iyo marqaatiyadaada shaqo. Warbixin ku saabsan aqoonsiga darajada shisheeye iyo aqoontooda waxaa laga heli karaa Gudiga Waxbarashada Qaranka. Ujeedada wareysiga shaqada waa ogaanshaha sida aad ugu haboontahay shaqada. Waxaa lagu weydiinayaa su'aalo loogu talagalay inay go'aamiyaan kartidadaada, dhiira galintaada iyo rabitaankaada shaqo iyo ururka oo weydiinayo. Si cad uga jawaab iyo muuji rabitaankaada shaqada. Laxiriirka indhaha wareystaha

waa laga mahad celiyaa wareysiyada shaqo ee Finland. Waxaa laga yaaba inay noqdaan hal ama wareystayaal badan.

Markaad udiyaar garooweysiid wareysiga, ka fikir awoodahaaga aad kala samintahay shaqada aad codsaneysiid, iyo dhinacyada aad u baahanatahy inaad hormariso. Xiliga wareysiga shaqo waxaa inta badan lagu siinayaa fursado aad su'aalo ku weydisid. Diyaarso qaar kamid ah su'aalo suuro gal ah wareysiga kahor. Waa muhiim, sikastaba, inaad timaatiid wareysiga adigoo diyaarsan iyo aad soo ogaatay warbixino badan oo shaqada iyo hay'ada ku saabsan sida suurto galka ah. Tani waxay tuseysaa daneentaada.

Shaqo bixiyaha waxuu lasoo xiriirayaa shaqadana siiyaa musharaxa guuleysto. Hadii shaqada lagu siiyo, waa inaad lasocodsiisaa shaqo bixiyaha sida suurta galka ah oo ugu dhaqsiha badan hadii aad ogolaatay ama aadan ogolaanin.

**Hadii helitaanka shaqo ay ku gu adkaato**, waxaa laga yaabaa inaad ka faaido barashada xirfadaha iyo dadaalkaada sida shaqo doon.  Waad sameyn kartaa, tusaale, raadi jago shaqo waayo aragnimo ama tababar, casriyeey aqoontaada ama shahaado cusub raadi, ama hormari xirfadahaada luuqad. Tababarka-Rekry waxaa diyaariyay adeegyada TE iyo tababarada shaqo oo noqon kara wado fiican oo shaqo lagu raadiyo. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad xaq u lahaatid kaalmo mushaar, oo shaqo bixiyahaaga dalban karo marka uu ku shaqaaleysiinayo. Hadii aad xaq u lahaatiid kaalmo mushaar, waa inaad ku sheegtaa codsigaada shaqo ama markaad shaqo codsaneysiid. Ka laxiriir adeega TE warbixino dheraad ah oo ku saabsan tababarka shaqo iyo kaalmada mushaarka.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**Kirjoita työhakemus ja CV**
www.te-palvelut.fi › Työnhakijalle › Löydä töitä › Vinkkejä työnhakuun

**Tutkintojen tunnustaminen ja kansainvälinen vertailu**
www.oph.fi › Koulutus ja tutkinnot › Tutkintojen tunnustaminen

**Sosiaali- ja terveysalan lupa- ja valvontavirasto**
www.valvira.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**Skriv jobbansökan och CV**
www.te-tjanster.fi › För arbetssökande › Hitta jobb › Tips för jobbsökning

**Erkännande och internationell jämförelse av examina**
www.oph.fi › Utbildning och examina › Erkännande av examina

**Tillstånds- och tillsynverket för social- och hälsovården**
www.valvira.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**How to write a job application and a CV**
www.te-services.fi › For jobseekers › Finding a job › Tips for finding a job

**Recognition and international comparability of qualifications**
www.oph.fi › Services

**National Supervisory Authority for Welfare and Health**
www.valvira.fi/en



# 2. Shaqo bilaabista

## Noocyo kaladuwan oo shaqo

Shaqadaada way bilaabatay, iyo waxaadna bilaawday inaad kashaqeysid maamulka hoose iyo kormeeraha badroonigaada, taariqda aad la heshiisay shaqo bixiyaha.  Waxaa jira noocyo kala duwan oo heshiisyada shaqooyinka ah. Nooca ugu caansan waa joogtada, waqti go'an iyo waqti yar.

Sida shaqaale, muhiim ma'ahan inaad meesha shaqada ka shaqeysid.  Waxaad, tusaale, ka shaqeyn kartaa guriga. Hadii lagu shaqaaleeyo waxaa larabaa in badroonigaada mushaar ku siiyo. Badroonigaada sidoo kale waa inuu bixiyaa lacagta hawlgabka iyo lacagta sharciyada kale adiga ogolaanshahaada, iyo inuu kuu diyaariyo adeegyada caafimaadka shaqada.

Nooca ugu caansan uguna badan ee heshiiska shaqo waa **furan-dhamaaday heshiis waqti-buuxa**, sidoo kale waxaa lagu magacaabaa**heshiis joogta ah**. Hadii aadan kula heshiinin badroonigaada hadii kale, waxaa lagu shaqaaleysiiyay muddo saacadeeda aan go'neen. Laguma ceyrin karo sabab la'aan.  Sidoo kale waxaa lagu **shaqaaleyn karaa waqti go'an**, laakin heshiis noocaas ah waxuu marwalbo u baahanyahay sababo sharci, tusaale hadii lagu shaqaaleysiiyo si kumeelgaar ah oo qof laguugu badalay ama hadii shaqada ay tahay xiliyada dabiiciga ah.

**Shaqo xiliyeedka** kaliya waxay bixisaa shaqo qeyb sanadka ka mid ah, tusaale xiliga miraha soo go'aan ama xiliga barafka lasaaro. Sharciga shaqada xitaa way kujirtaa xilliyada shaqaalaha.

Waxaad kula heshiin kartaa badroonigaada inaad shaqeyneysiid kaliya qeyb maalinta kamid ah ama isbuuc; tani waxay micnaheeda tahay in lagu

**shaqaaleysiiyay qeyb waqtiga ka kamid ah**. Shaqaalaha waxaa loo tixgalinayaa waqtiga-barkiisa hadii ay si caadi ah ushaqeeyeen in ka yar 30 ama 35 saacadood isbuucii. Mushaarka waqtiga-barkiisa waxay ku xirantahay waqtigaada shaqo.

Hadii laguugu shaqaaleeyay dhanka shirkadaha shaqada iyo sidaas dardeed **shaqaalaha lashaqaaleeyay**, waxaad heshiis shaqo la leedahay shirkada shaqaaleynta xitaa hadii aad ushaqeysid hay'ada kale. Shirkada shaqaaleynta ayaa bixiso mushaarkaaga, magdhawga fasaxa iyo waqtiga dheeraadka ah. Sida shaqaale lashaqaaleeyay waxaa waajib kugu ah inaad ka shaqeysid maamulka hoose iyo kormeeraha shirkada ku soo shaqaaleysay. Waxaa si caadi ah aad xaq ugu leedahay adeegyada shirkada ku soo shaqaaleysay ay siiso shaqaalaheeda, tusaale kaalmada cuntada.

Hadii shirkada ku shaqaaleysay ay tahay ajinabi, waxaa tahay **shaqaale waqti go'an**. Dhoor sharuudo iyo sharciyada heshiisyada shaqaalaha Finnish waxay ku sheegeen shaqaalaha waqtiga go'an, tusaale kuwa laxiriiro mushaarka uguyar, badan- iyo lacagta waqtiga dheeraadka iyo fasaxa sanadlaha. Kuwani waxaa nidaamiyay xeerka Shaqaalaha Waqtiga Go'an.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**Työsopimus ja työsuhde**
www.tem.fi › Työ › Työlainsäädäntö
› Työsopimus ja työsuhde

**Laki lähetetyistä työntekijöistä**
www.finlex.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**Arbetsavtal och anställningsförhållande**
www.tem.fi › Arbete › Arbetslagstiftning
› Arbetsavtal och anställningsförhållande

**Lag om utstationerade arbetstagare**
www.finlex.fi/sv

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**Contracts of employment and employment relationships**
www.tem.fi › Work › Labour legislation › Contracts of employment and employment relationships

**Posted Workers Act**
www.finlex.fi/en

## Heshiiska Shaqada iyo lacag bixinta mushaarka

Isla sharciyada iyo heshiisyada shaqada ayay ku qorantahay labadaba Finnish iyo shaqaalaha ajinabiga marka shaqada ay kadhacdo Finland. Heshiis shaqo waxaa lagu sameyn karaa afka, laakin heshiis shaqo oo qoran ayaa mar walbo lagu taliyay.

Labo koobi oo **heshiiska shaqada ah** ayaa sida caadiga ah la qoraa: hal badrooniga ah iyo hal adiga sida shaqaale ahaan.  Iska hubi inaad fahantay heshiiska xeerarka iyo sharuudaha. Ururada shaqaale iyo wakiilada ururada shaqaalaha ayaa kugu caawin karo turjumida sharuudaha (fiiri cutubtaan tilmaanta ah ee ku saabsan ururada shaqaalaha).. Hadii heshiis qoraal ah oo shaqo aan la sameynin, iyo adigana lagu shaqaaleeyay in ka badan bil, waxaad xaq uleedahay inad heshid **qoraal faahfaahinayo xeerarka iyo sharuudaha shaqadaada**.

Ugu yaraan ku waan soosocda waa inay faahfaahiyaan heshiiska shaqada:

- waajibaadkaada
- taariiqda bilawga iyo mudada shaqadaada
- sababta heshiiska waqtiga-go’an, hadii lagu shaqaaleeyay waqti-go’an
- goobta shaqada
- mushaarka, faa’idada iyo mudada lacag bixinta
- saacadaha shaqada iyo nasashada
- fasaxyada
- wadajirka heshiiska shaqada oo heshiiskaaga shaqo waafaqsan
- xiliga tijaabada suurtogalka ah
- xiliga ugeysiinta

Heshiiska shaqadaada laga yaabo inuu sheego **xiliga tijaabada**. Xiliga lagu gudo jiro tijaabada, labadaba adiga iyo badroonigaada waad joojin kartaan heshiiska ayadoon waqti ogeysiin ah laheyn. Mudada tijaabada ugu badan waa afar bilood. Hadii lagu shaqaaleeyo in ka yar sideed bilood, mudada tijaabada kama dheraan karto nuska mudada shaqadaada.

**Markii mushaarkaaga lagu siiyo** waa in lagu siiyaa rasiid lacageed oo tusinayo asalkaaga mushaar, magdhawga labixiyay iyo wixii laga jaray mushaarkaaga. Rasiid lacageed waa in la siiyaa shaqaalaha hadii ay weydiistaan. Diidmada bixinta rasiid lacageed waa ciqaab sharci ah.  Iska hubi in mushaarkaaga si sax ah loo bixiyay iyo maqribada oo dhan, saacadaha dheeraadka iyo magdhawyada kale ee labixiyay. Sida laga soo xigtay Sharciga Heshiiska Shaqada, mushaarkaaga waa in lagu shubaa akoontiga bangiga aad sheegtay.  Lacagta mushaarkaaga waxaa kaliya oo cadaan laguu siin karaa markay jirto sababo qasab ah.

Badroonigaada ayaa ka jaro **canshuurta** mushaarkaada bil walbo. Waxaad ka heli kartaa warbixin dheeraad oo ku saabsan canshuurta Maamulka Canshuurta ee Finnish.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**In to Finland**
www.intofinland.fi

**Työsopimus**
www.tyosuojelu.fi › Työsuhdeasiat › Työsopimus

**Verohallinto**
www.vero.fi

**Työehtosopimukset**
www.yrittajat.fi › Työnantajan ABC › Työehtosopimukset

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**In To Finland**
www.intofinland.fi/sv

**Arbetsavtal**
www.tyosuojelu.fi/sv › Anställningsfrågor › Arbetsavtal

**Skatteförvaltningen**
www.vero.fi/sv-FI

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**In To Finland**
www.intofinland.fi/en

**Employment contract**
www.tyosuojelu.fi › Working in Finland › Employment contract

**Tax Administration**
www.vero.fi/en-US

## Tababarka laqabsiga

Waa waajibaadka badroonigaada inuu kusiiyo tababarka laqabsiga. Marwalbo weydiiso tababar marka aad bilaabeysiid shaqo cusub hadii aanan lagu siinin. Ujeedada laqabsiga tababarka waa si laguu siiyo bilaw fiican oo goobta shaqadaada cusub ah.

Waxaad baraneysaa shaqadaada, booska shaqada iyo dhaqanka shaqada ururka inta aad kujirto muddada laqabsiga. Waa muhiim inaad baratiid erayada iyo eray bixinta gaarka ah ee shaqada looga baahanyahay, iyo baro isticmaalka qalab kasta iyo alaabaha oo laga yaabo inaad kushaqeysid. Ayadoo qeyb ka ah laqabsashada tababarkaaga waxaa lagu barayaa, tusaale, arimaha laxiriiro caafimaadka iyo amniga, hormarinta xirfadaha iyo qabsashada kartida shaqo iyo wanaaga shaqada. Waxaa sidoo kale lagu siinayaa warbixin ku saabsan caafimaad iyo amniga shaqada.

Xiliga tababarka waxaa lagu barayaa shaqaalaha, kormeeraha, macaamiisha imaan kara iyo saaxibada ganacsi. Baro shaqaalaha shirkada. Tani waxay kugu caawineysaa inaad dareentid waxbadan guriga goobta shaqada iyo la qabsashada bulshada shaqada. Sidoo kale ogow sida lagaa rabo inaad udhaqantiid goortii aad la macaamileysid macamiisha.

Qofka bixinaayo tababarka laqabsashada laga yaabo inuu noqdo, tusaale, kormeerahaaga ama shaqaalaha shirkada. Inta badan dad badan oo ka socda bulshada shaqada ayaa kulug leh hawlaha tababarka. Waa muhiim inaad ugaato qofkaad weydiin kartid hadii su'aal laxiriirta shaqadaada aad qabtiid, ama aadan qaar fahmin.  Marwalbo weydii hadii aadan hubin waxaad sameyneysid!

Firfircoon ahaw iyo isticmaal dadaalkaaga si'aad u

hesho warbixin kugu caawiyo bilawga shaqadaada. **Iska hubi inaad taqaaniid waxa waajibaadyadaada ay yihiin**. Barashada tababar fiican waxay kugu caawineysaa guusha shaqadaada.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**Perehdyttäminen**
www.ttl.fi › Aihealueet › Työyhteisö ja esimiestyö › Johtaminen › Perehdyttäminen

**Työnopastus ja perehdyttäminen**
www.tyosuojelu.fi/fi/opastus

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**Introduktionsguide**
www1.vaasa.fi/henkilostopalvelut/julkaisut/pdf/perehdyttamisopas.pdf

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**Induction training**
www.ttl.fi/en › Topics › Changing work life › Immigrants and work › Integration into work and at the workplace

## Ururada shaqaalaha

Shaqaalaha Finland badanaa waxay kamid yihiin urur shaqaale.  Ururada shaqaalaha waxay xubnooyinka katirsan siiyaan talooyinka arimaha shaqada iyo ilaaliso danaha xubnahooda. Sida xubin katirsan urur shaqaale sidoo kale waxaad kamid tahay deeqda shaqo la'aanta.

Xubnaha ururada shaqaalaha waxay bixiyaan kamid noqoshada xubin nimo, taasoo guud ahaan udhaxeyso 1 iyo 2% oo mushaarka shaqaalaha guud.

Ururada shaqaalaha iyo wakiilka badrooniga waxay si wadajir ah ugu dhaxeeyaan heshiiska shaqada. Heshiisyo wadajir ah ayaa aas aaso qiimaha mushaarka, saacadaha shaqada, waqtiga dheeraadka iyo lacagta jrirada, fasaxa, iyo sharuudaha kale ee shaqada.  Sida hubin katirsan ururka shaqaalaha waxaad heleysaa caawin ah qilaafka shaqada. Sida xubin katirsan ururka sidoo kale waxaad kamid tahay**deeqda shaqo la'aanta**. Dhacdada shaqo la'aanta aan iqtiyaarka aheyn, waxaad xaq uleedahay daqliga-laxiriira faaidada shaqo la'aanta hadii aad aheyd xubin katirsaneyd deeqda shaqola'aanta ugu yaraan 26 isbuuc (sida agoosto 2014).. Tirada faa'idada waxay ku xirantahay mushaarkaaga. Hadii aad xaq ulahaatiid daqliga-laxiriira faaidada shaqo la'aanta, maheleysiid lacagaha joogtada ee kaalmo maalmeedka ee katimidaada hay'adaha caymiska bulshada (looyaqaan KELA)

Waxaad xaq uleedahay daqliga-laxiriiro faaidada shaqo la'aanta, laakin xaq uma lihiid adeegyada kale ee ururada shaqaalaha' hadii aad kamid tahay deeqda shaqo la'aanta.  Waad kubiiri kartaa midkood Deeqda Shaqo la'aanta Lahubo ama kuwa deeqda ururada shaqaale. Ku soobiirka xubinnimada Deegda Shaqo la'aanta Lahubo waa wax ka yar qiimaha xubin ka mid naqoshada ururada shaqaalaha. Ka laxiriir sharuudaha

kale ee xeerarka xubin ka mid noqoshadooda Deeqda shaqo la'aanta Lahubo.

Shaqadaada iyo gaar ahaan sidoo kale aqoontaada waxay go'aamineysaa ururka shaqaalaha ee aad kubiireysid. Ka laxiriir xarunta dhaxe ee ururada shaqaalaha warbixin dheeraad ah.  Ku dhawaadkii dhamaan ururada shaqaalaha Finland waxay ka mid yihiin hal kamid ah sadexda xarun ee ururada:

- Ururka Dhexe ee Ururada Shaqaale ee Finnish - SAK
- Shaqo Bixiyaasha Finnish ee shaqaalaha mushaarka qaata – STTK
- Shaqo Bixiyaasha ururada Xirfadaha iyo Maareynta shaqaalaha ee Finland – AKAVA

Waxaa doortay guud ahaan**wakiilada ururada** ayaa matalo ururada shaqaalaha booskaaga shaqo, iyo udhaxeeya shaqaalaha iyo shaqo bixiyaasha. Wakiilada ururada waxay hubiyaan in heshiisyada shaqada iyo sharciyada shaqada loogu hogaansanyahay goobaha shaqada iyo soo farageliyaan hadii wax dhib ah ay yimaadaan.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**Suomen ammattiliittojen keskusjärjestö SAK**
www.sak.fi

**Toimihenkilökeskusjärjestö STTK**
www.sttk.fi

**Korkeakoulutettujen työmarkkinajärjestö AKAVA**
www.akava.fi

**Yleinen työttömyyskassa YTK**
www.ytk.fi

**Ammattiyhdistysliikkeen ABC**
www.akava.fi › Julkaisut › Esitteet ja oppaat
› Ammattijärjestöjen toiminta

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**Finlands Fackförbunds Centralorganisation FFC**
www.sak.fi/svenska

**Tjänstemannacentralorganisationen STTK**
www.sttk.fi/sv

**Centralorganisationen för högutbildade i Finland**
www.akava.fi/sv

**Den försäkrande arbetslöshetskassan YTK**
se.ytk.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**The Central Organisation of
Finnish Trade Unions SAK**
www.sak.fi/english

**The confederation of Unions for
Professional and Managerial Staff in Finland**
www.akava.fi/en

**The Assured Unemployment Fund YTK**
en.ytk.fi

**The Finnish Trade Union Movement
– What Every Employee Should Know**
www.akava.fi › Julkaisut › Esitteet ja oppaat
› Ammattijärjestöjen toiminta



# 3. Xirfadaha iyo barashada shaqada

## Xirfadaha luuqada Nolosha shaqo ee Finnish

Garashada Finnish ama Iswiidhiska intabadan waa sharuudaha shaqada Finland, marka waxay kugu qasbeysaa inaad luuqada baratiid. Xirfadaha luuqad waxay kaa caawineysaa inaad ku guuleysato shaqada iyo dareentid gurigaada Finland.  Goobta shaqada waa deegaan wanaagsan oo aad ku hormarisid xirfadahaada luuqad.

Finnish ayaa looga hadlaa kudhawaad 90% sida luuqada koowaad iyo Swedish oo ayadana 5% oo Finns ah. Shaqooyinka kala duwan waxay ubaahantahay heerar kala duwan oo xirfad luuqad ah.  Heer wanaagsan oo luuqada Finnish ama Iswiidhiska ah waa muhiimka goobaha qaarkood iyo shaqooyinka, laakin meelaha kale waa suurogal inaad ku gashid luuqad yar.  Tusaale, adeega macaamiisha iyo shaqada bukaanka badanaa waxay ubaahantahay heer sare oo Finnish ama Iswiidhis ah.

Ugow xeerka xirfada luuqad oo ay ubaahantahay shaqada aad codsaneysiid. Xasuuso, sikastaba, taas marwalba waa suuro gal inaad ku hormariso xirfadahaada luuqada shaqada. Inta badan oo aad ku isticmaashiid luuqada meelaha shaqo iyo meelo kale, inta badan oo aad baraneysid.  Dhaxgalka shaqaalaha shirkada ee luuqada ajinabi waa wado fiican oo lagu barto, marka waxay kuugu qasbeysaa inaad ugu hadashiid Finnish ama Swedish goobta shaqada xitaa hadii aad sifiican ugu hadashiid, tusaale, ingiriis.

Koorsooyinka luuqadaha inta badan waxay kujirtaa tababarka isdhaxgalka socdaalka.  Manhajyada'

shaqaalaha, xarunta waxbarashada dadka weyn, iskoolka dugsiyada sare ee dadka weyn, iyo jaamacadaha furan waxay bixiyaan koorsooyinka Finnish iyo Iswiidhiska ah. Sidoo kale waad u baran kartaa luuqadaha si xurnimo ah. Tusaale, waxaa jiro qalab barasho oo intarneetka ah oo taageera barashada Finnish, Ingiriis iyo Iswiidhis, taasoo u baahan shaqooyinka kala duwan.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnish ah

**Suomen ja ruotsin kieli**
www.infopankki.fi/fi › Elämä Suomessa › Suomen ja ruotsin kieli

**Koti Suomessa -verkkopalvelu**
www.kotisuomessa.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**Finnish and Swedish**
www.infopankki.fi/sv › Livet i Finland › Finska och svenska språket

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**Finnish and Swedish**
www.infopankki.fi/en › Living in Finland › Finnish and Swedish

## Warbixin dheeraad ah oo afka Soomaaliga ah

**Finnish iyo Iswiidhis**
www.infopankki.fi > Nolosha Finland > Luqada Finnishka iyo Iswidishka

## Hormarinta xirfadaha

Markaad shaqo bilaawdid, iska hubi inaad garaneyso waxa lagaa filanayo adiga iyo shaqadaada. Lahadal kormeerahaada iyo u xaqiiji in aad la fahantahay fahanka sharuudaha shaqadaada. Waa muhiim inaad si joogta ah u hormarisid xirfadaha laga rabo shaqadaada.

Hormarinta xirfadaha waxaa loola jeeda barashada kadhacdo shaqada, iyo hormarinta xirfadaha iyo qibradaha xirfadeed oo ka dhacdo nolasha shaqo oo idil. Hormarinta xirfadaha waxay noqon kartaa, cusbooneysin, balaarin ama guud ahaanba badalayo xirfada kuu go'an. Sidoo kale waa muhiim markii waajibaadkaada iyo doorkaaga uu badalmo. Badroonigaada waxuu taageeri karaa hormarinta xirfadahaaga asagoo ku siinayo waqti aad ku qaadatid **tababar gaar ah**. Tababarka waxaa laga yaabaa inuu ka dhaco midkood xiliga shaqada ama saacadaha banaanka, iyo laga yaabo inuu badroonigaada bixiyo midkood qeyb ahaan ama mushaar buuxo.

Hormarinta xirfadaha shaqo waxay kugu deeqeysaa, tusaale

- qiimeynta shaqadaada kadibna midkood kaligaa ama koox dhaxdooda
- sheegida xaaladaha tagay midkood aad u wanaagsanaa ama aad uxumaa
- barashada muddada xirfadaada lagu gudu jiro
- aqrinta xirfada suugaanta.

Sheegista ama ka faaideysiga wadadaada barasho ayaa kaa caawineyso hormarinta xirfadaada. Matahay aqrinta, dhageysiga ama sameynta wadada ugu fiican oo aad ku baratiid? Kabarashada waaya aragnimada shaqaalaha shirkada sidoo kale waa qaab lagu hormariyo xirfadaada shaqo.

Waad lahadli kartaa kormeerahaada waxii arimo ah oo la xiriiro shaqadaada; tusaale laqabsiga culeyska shaqadaada, isbadalka ka dhacay goobta shaqada ama dhaqanka shaqada. Sidoo kale weydii natiijada shaqadaada. Waa waxtar qaali ah sida aad jeclaan laheyd inaad u hormariso iyo u toosiso xirfadahaaga. Gooba badan oo shaqo waxay leeyihiin sanadle waxqabadka qiimeynta, oo xiliga lagu gudo jiro shaqaalaha iyo kormeeraha ay kawada hadlaan arimahaan.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**Opintoluotsi.fi – Kaikki koulutustieto yhdestä osoitteesta**
www.opintoluotsi.fi

**Tietoa Suomen aikuiskoulutusjärjestelmästä**
www.minedu.fi/OPM › Koulutus › Aikuiskoulutus

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**Opintoluotsi.fi – Allt om utbildning på en adress**
www.opintoluotsi.fi/sv-FI

**Vuxenutbildningssystemet i Finland**
www.minedu.fi/OPM › På svenska › Utbildning › Vuxenutbildning

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**Opintoluotsi.fi – One-stop access to education information in Finland**
www.opintoluotsi.fi/en-GB

**Adult education system in Finland**
www.minedu.fi/OPM › In English › Education › Adult Education

# Notes



# 4. Caafimaadka iyo amniga

## Amniga iyo caafimaadka shaqada

Badroonigaada ayaa masuul ka ah inuu hubiyo amniga iyo caafimaadka shaqada goobta shaqo, iyo hogaansanaanta xeerarka quseeyo amniga iyo caafimaadka. Weydii talo kormeerahaaga ama wakiilka kale ee badrooniga arimaha amniga iyo caafimaadka, iyo ka soo warbixi wixii qabsoomi waayay islamarkaas.

Badrooniga waa inuu aqoonsadaa qatarta iyo halista ka imaankarta goobta shaqada iyo inuu qiimeeyo muhiimada laxiriirta amniga iyo caafimaadka shaqaalaha. Badrooniga waa inuu hormariyaa iyo siiyaa shaqaalaha qalabka amaanka shaqsiga ku haboon ee ku saleysan xeerarka.  Badroonigaada waa inuu hubiyaa, tusaale, in mashiinada oo dhan ay yiihin heer nabadgalyo iyo qeylada inaysan dhaafin heerka loogu talagalay.

Sida shaqaale waa inaad:

- u raacdaa tilmaamaha iyo shaqada si fiican, si nadiif ah
- ka taxaddar iyo ka feejignaaw shaqadaada
- isticmaal qalabka amniga kuugu haboon (tusaale. badbaadiyaha maqalka, koofiyadaha difaaca, difaaca hindhista ama difaaca indhaha)
- ilaali amnigaada iyo amaanka dadka kale
- ogoysii kormeerahaada ama madaxda amniga warshada hadii aad ogaatiid wax qatar ah oo goobta shaqada
- badroonigaada la socodsii hadii aadan fahmin tilmaamaha ama nidaamka amniga shaqaalaha

Goob walboo shaqo waxay leedahay **sarkaal amni shaqaale** kaa soo ku matalo badrooniga arimaha

amniga shaqaalaha. Badrooniga waxuu noqon karaa sida sarkaal amniga shaqaalaha. Sida sharciga waafaqsan, goobaha shaqada waaweyn waa inay lahaadaan**sarkaal amni shaqaale ama guddi amni shaqaale**. Sharciga waxuu ubaahanyahay shaqo bixiyaasha oo dhan, ayadoon laga eegin weynidooda, inay ku aas aasaan ficil qorsho amni shaqaale.   Hadii ay jiraan wax qabsoomi waayay oo laxiriira amniga shaqaalaha goobta shaqadaada iyo booskaada aan waxba ka qabaneynin, laxiriir sarkaalka amniga shaqaale ee xaafadaada.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**Työturvallisuus ja riskien hallinta**
www.ttl.fi › Aihealueet › Työturvallisuus ja riskien hallinta

**Työsuojeluhallinto**
www.tyosuojelu.fi

**Työturvallisuuslaki**
www.finlex.fi

**Aluehallintovirasto (AVI): työsuojelu**
www.avi.fi › Aiheet › Työsuojelu

**Työturvallisuuskeskus (TTK)**
www.ttk.fi

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska

**Arbetssäkerhet**
www.ttl.fi/sv › Temaområden › Arbetssäkerhet

**Arbetarskyddsförvaltningen**
www.tyosuojelu.fi/se

**Arbetarskyddslag**
www.finlex.fi/sv

**Regionförvaltningsverket (AVI): arbetarskydd**
www.avi.fi/sv › Temasidor › Arbetarskydd

**Arbetarskyddcentralen (TTK)**
www.ttk.fi/sv

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**Safety at work**
www.ttl.fi/en › Topics › Safety at work

**Occupational Safety and Health Administration**
www.tyosuojelu.fi/fi/workingfinland

**Occupational Safety and Health Act**
www.finlex.fi/en

**Regional State Administrative Agencies (AVI): Occupational Safety and Health**
www.avi.fi/en › Index › Occupational safety and health

**Centre for Occupational Safety (TTK)**
www.ttk.fi/en

## Adeegyada caafimaadka shaqaalaha

Sida sharciga Finnish waafaqsan, badrooniga waa inuu u diyaariyaa adeegyada caafimaadka shaqaale oo shaqaalaha oo idil, xitaa hadii hal shaqaale kaliya uu goobta shaqada joogo. Kuwa lashaqaaleeyay muddo-go'an ama waqti-dhiman waxay sidoo kale xaq u leeyihiin adeegyada caafimaadka shaqaalaha. Qiyaasta adeegyada waxay ku kala duwan yihiin inta udhaxeyso goobta shaqada iyo sidoo kale waxaa lagu dari karaa, dheeraadka adeegyada sharciga laga rabo, daryeel caafimaad iyo adeegyada caafimaadka kale.

Adeegyada caafimaadka shaqaalaha waxaa loogu talagalay inay ka hortagaan dhibaatooyinka caafimaad oo ay keentay shaqada ama goobaha kale ee shaqada, iyo hormarinta kartida shaqo iyo wanaaga shaqada. Bixiyayaasha adeegyada caafimaadka shaqaalaha waxay ku barayaan adiga iyo badroonigaada arimaha laxiriiro caafimaadka, amniga goobta shaqo iyo dhaqanka shaqada.

Adeegyada caafimaadka shaqaalaha waxaa kujira 'baaritaanka caafimaadka iyo talooyinka arimaha gargaarka hore ee goobta shaqada. Adeegyadaan waxaa u baahan sharciga iyo marwalbana shaqaalaha waa u bilaasha. Badroonigaada waxaa waajib ku ah inuu kuu sheego meesha ay ku taalo adeegyada caafimaadka shaqaalaha iyo waxa ay ka koobanyihiin.

Bilawga shaqada, ama xiliga tijaabada aad ku jirtid, shaqaalaha inta badan waxuu maraa baaritaano caafimad ama baaritaanka caafimaadka shaqaalaha. Ujeedaan waa ogaanshaha hadii aad muuqaal iyo maskaxba aad ku haboontahay qabashada shaqadaada. Baaxada baaritaanka, iyo soo noqoshada baaritaanka danbe, waxay ku xirantahay nooca shaqadaada tahay, deegaanka shaqada iyo suuragalka ah in sharuudo gaar

ah ay shaqadaada lahaato. Baaritaanka caafimaad si caadi ah looma qaado hadii heshiiska uu gaabanyahay, ilaa nooca shaqada ay ubaahato baaritaanka. Wa waajib kaar caafimaad ayaa laga rabaa goobaha qaarkood oo keento helis gaar ah oo caafimaadka (tusaale. alxanle iyo dab damiye).. Kaarka caafimaadka shaqada laga yaabo inay tahay sharuudo dheeraad ah oo warshada dhismaha.

Waxaa dheer adeegyada sharuudaha sharciga rabo, adeegyada caafimaadka shaqada laga yaabo inay kujirto daryeel caafimaad (tusaale. markaad sanboor qabtiid) iyo adeegyada daryeelka caafimaadka kale (tusaale. waxaad arkeysaa talaal, gaar ah).. Ka hor ogow adeegyada bilaashka ah iyo kuwa aan bilaashka aheyn. Sidoo kale ogow daryeel caafimaad bixiyaasha (tusaale. GP/dhaqtarka ilkaha) ee laguu ogolyahay inaad aragtiid xiliga saacadaha shaqada.

### Way fiicantahay inaad ogaatid daryeelka caafimaadka shaqaalaha:

- Marwalbo diyaarso balamo baaritaanka caafimaad iyo daryeelada caafimaadka kale ka hor. Kormeerahaada ama qofka sameynayo tababarkaada laqabsi ayaa kula socodsiinayo sida aad u diyaarsan kartiid balan (teleefon, intarneed ama dhinaca kormeeraha)..
- Marwalbo imoow waqti hore balamahaada.
- Horay u qaado dhamaan waraaqahaada laxiriiro caafimaadkaada, sida warbixinta ku saabsan talaalada iyo daawooyinka, si aad u martiid baaritaanka caafimaadka shaqada.
- Daryeelka caafimaadka shaqada shaqaalaha, sida dhaqaatirta, kalkaaliyayaasha, kalkaalisada jimicsiga iyo qabiirada cilmi nafsiga waxay ku xirantahay kalsoonida shaqaalaha. Tani waxay micnaheeda tahay looma ogola inay lawadaagaan qofna warbixin laxiriira caafimaadkaa-da ama warbixin kale oo adiga kuugu saabsan ogolaan-shahaada la'aanteeda.

## Warbixin dheeraad ah oo afka Finnishka ah

**TTL: Työterveyshuolto**
www.ttl.fi › Aihealueet › Työterveyshuolto

**STM: Työterveyshuolto**
www.stm.fi › Sosiaali- ja terveyspalvelut › Terveyspalvelut › Työterveyshuolto

**Työterveyshuoltolaki**
www.finlex.fi

**Työterveyshuolto**
www.tyosuojelu.fi › Työsuojelutoiminta työpaikalla › Työterveyshuolto

## Warbixin dheeraad ah oo afka Iswiidhiska ah

**TTL: Företagshälsovård**
www.ttl.fi/sv › Temaområden › Företagshälsovård

**SHM: Företagshälsovården**
www.stm.fi › Social- och hälsotjänster › Hälsotjänster › Företagshälsovård

**Lag om företagshälsovård**
www.finlex.fi/sv

## Warbixin dheeraad ah oo afka Ingiriiska ah

**FIOH: Occupational health services**
www.ttl.fi/en › Topics › Occupational Health Services

**Ministry: Occupational Health Care**
www.stm.fi/en › Social and health services › Health services › Occupational health care

**Occupational Health Care Act**
www.finlex.fi/en

## Jirro iyo awooda shaqo

Hadii aad dhibaatooyin caafimaad qabtiid ayna kugu adkaatay laqabsashada shaqada, lahadal kormeerahaada ama adeega caafimaadka shaqaalaha shaqada.  Shaqadaada waa la qorsheyn karaa si marka aysan uga tanaasulin caafimaadkaada. Goobo badan oo shaqo waxay leeyihiin nidaamyo diyaarsan oo waxqabad ah si loogu taageero kartida shaqada.  Ugow hadii goobtaada shaqo ay leedahay nidaamo noocaas ah iyo hadii ay leedahay, ugu dhaqan sida ayaga waafaqsan.

Waxaad qaadan kartaa fasax jiro hadii aad xanuunsatiid iyo aadan qaban karin shaqadaada. Waa inaad marwalbo usheegtaa badroonigaada hadii aad ka maqantahay shaqada. Badroonigaada xaq ayuu u leeyahay inuu ogaado sababta maqnaashahaada. Markaad jirantahay, waxaad ubaahantahay, **shahaado dhaqtar ama kaaliye** waxay ku xirantahay badrooniga iyo muddada maqnaashahaada, Inta badan shahaadada waxaa laga soo qaataa bixiyayaasha adeega caafimaadka shaqaalaha.

Hadii sababta maqnaashahaada xaq aad ulahaatiid, **waa lagu siinayaa mushaarkaada inta fasaxa xanuunka**.

- Hadii lagu shaqaaleeyay ugu yaraan hal bil oo bilawga fasaxa jirrada ah, waxaad xaq uleedahay mushaar buuxa
- Hadii shaqadaada socotay in ka yar hal bil, waxaad xaq uleedahay kalabarka mushaarkaada buuxay

Maheleysid marwalbo mushaar xiliga fasaxa jirada xitaa hadii aad heysatiid shahaado dhaqtar. Tusaale hadii si ula kac ah aad usu dhaawacdiid, bodroonigaada uma baahna inuu mushaar kusiiyo. Mararka qaar waxaa lagayaabaa inaad u baahantahay inaad ka maqnaatiid shaqada sababo laxiriira dhibaatooyin noloshaada gaarka ah ama sababta oo ah walaac. Xaaladahaan

